

U Furitaanka Caymiska Caafimaadka Qof Walba!

CUSUB! ! Iibsashada caymiska caafimaadka hadda way u fududahay soogalootiga aan sharciga haysan.

Laga bilaabo Noofeembar, qof kasta oo ku nool gobolka Washington wuxuu heli doonaa fursad uu ku iibsado caymiska caafimaadka iyo ilkaha iyada oo loo marayo Washington Healthplanfinder, iyada oo aan loo eegin xaaladda socdaalka.

Qof walba wuu is qori karaa laga bilaabo 1-da Nofeembar, 2023

Isdiiwaangeli ugu dambayn ilaa 15-ka Diseembar si aad u hesho caymiska caafimaadka oo bilaabmaya 1-da Janaayo, 2024. Isdiiwaangelinta furan waxay dhammaanaysaa 15-ka Janaayo, 2024.



Kaalmo ku hel lacagta caymiskaaga bil walbo

Qiimo dhimis loogu talagalay dadka dakhligoodu hooseeyo

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto Kaydinta Daryeelka Cascade, taasoo ka dhigan in gobolka Washington uu bixin doono qayb ka mid ah caymiskaaga caafimaadka. Haddii dakhliga reerkaagu uu ku jiro inta u dhaxaysa dabaqada hoose, waa laga yaabaa inaad u qalanto.

\$36,450 qof keli ah	\$49,300 qoys oo ka kooban 2	\$62,150 qoys oo ka kooban 3	\$75,000 qoys oo ka kooban 4	\$87,850 qoys oo ka kooban 5	\$100,700 qoys oo ka kooban 6
-------------------------	---------------------------------	---------------------------------	---------------------------------	---------------------------------	----------------------------------



Badbaadadaada ayaa noo muhiim ah.

- Diiwaangelintu ma saameynayso sharciga socdaalka ama codsiyada jinsiyaddaada, qoyskaaga, ama qof kasta oo kula nool.
- Sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka ayaa ilaaliya sirta dadka ka codsada caymiska caafimaadka ee Washington Healthplanfinder. Maclumaadka ku saabsan xaaladda socdaalka waxa loo isticmaali doonaa oo kaliya si loo go'aamiyo u-qalmitaanka caymiska ee looma isticmaali doono dhaqan-gelinta sharciyada socdaalka.

Ma u baahan tahay caawimo? 3 siyaabood oo aad ku heli karto caawimaad BILAASH AH oo ku saabsan isdiiwaangelinta

WAC

Xarunta Taageerada Macmiilka

Khadka bilaashka ah:

1-855-923-4633

TTY/TDD: 1-855-627-9604

SAACADAHA: 7:30-ka subaxnimo to 5:30-ka galabnimo

Caawinta ayaa lagu heli karaa in ka badan 200 oo luquadood.

BOOQO

mareegaheena

wahealthplanfinder.org



Sawir
koodka QR

KU XIDHNOW

xirfadle maxalli ah*

Ila soo xiriir 1-da Nofeembar
si aad isu diiwaangeliyo!

*Caawiyayaasha iyo Dhexdhedaadiyaasha waxay kaa caawin karaan inaad fahanto kaalmada dhaqaale ee la heli karo, ka jawaabi karaan su'alaha ku saabsan caymiska caafimaadka, waxayna kaa caawin karaan inaad wax ka iibsatid qorshayaasha. Haddii aadan garanayn in qof u sharciyaysan yahay inuu ku caawiyo, wac Xarunta Taageerada Macmiilka ee Washington Healthplanfinder lambarka 1-855-923-4633.